



BARNAAMIJKA MAAMULIDA QASHINKA WAXYEELADA LEH

Qorshaha 2021

Alaabaad badan oo aanu ku isticmaalno guriga iyo shaqada - oo ay ku jiraan alaabaadka wax lagu nadiifiyo, sunta cayayaanka, saliida injiinka, ranjiyada saliida leh, iyo dhalaaliyayaasha - waa sun. Alaabaadka waxyeelada leh waxaa ku jira waxyaabo halis ama khatar ah oo waxyeelo soo gaadhsiiyaa deegaanka iyo caafimaadka bilaa aadanka. Qaar ayaa khatar keena xataa marka aanu isticmaalno oo aanu si wanaagsan u daadino.

Barnaamijka Maamulida Qashinka Waxyeelada Leh (Barnaamijkeena) waxa uu ka shaqeyaa yaraynta waxyeelada inay soo gaadho dadka iyo deegaanka Degmada King.



Himiladeena

Waxa aanu ka shaqaynaynaa himilo la wadaago: oo qoomiyada aan laga duulin marka la eego u baylaha agabka sunta leh ee goyska iyo ganacsiyada Degmada King, iyo deegaanka Puget Sound oo ah deegaanka ugu nadiifsan dalka - oo ah mid aan lahayn kiimikada sunta ah.

Sida aanu u shaqayno

Waxa aanu ka shaqaynaa sidii aanu u gaadhi lahayn himiladeena oo aanu ugu gaadhi lahayn adeegyada la xidhiidha siyaasada, kahortaga iyo uruurinta.

Siyaasada



Waxa aanu u ololaynaa isbadal heerka nidaamka ah anagoo u marayna hindisayaasha masuuliyadda siyaasada iyo alaabta si loo xaqiijiyo in kiimikada iyo alaabaadku ay u yihiin amaan dadka iyo deegaanka.

Kahortaga



Waxa aanu siinaa waxbarasho, wacyi gelin, kaalmo farsamo, iyo gunooyin dadka degan iyo ganacsiyada si loo yareeyo soo gaadhida alaabaadka waxyeelada leh oo loogana caawiyo inay la qabsadaan dhaqano amaan badan.

Uruurinta



Waxa aanu siinaa adeegyada uruurinta qashinka sunta leh goysaska iyo ganacsiyada yaryar ee u qalma si aanu u ilaalino caafimaadka bilaa aadanka, deegaanka, iyo nidaamkeena qashinka.



Waxaan doonaynaa inaad noo waranto!

Qorshaha 2021 waxa laga helaa khariirada laga duulayo ee sida aanu uga shaqayn doono yaraynta u baylaha khatarta ee dadka iyo deegaanka ee Degmada King ilaa 2030.

Qorshaha 2021 waxa uu ahaan doonaa mid u furan qiimaynta dadwaynaha laga bilaabo Julaay 19 - Agoosto 16.

Qorshaheena

Qof kasta waa inuu helaa caafimaad isku mid ah, iyada oo aan loo eegeynin qoomiyadiisa ama bulshadiisa. Maadaama oo bulsho kastaa ay wajahdo caqabado kala duwan si ay u gaadho natiijoyinkan, bulshadu waxay yeelan kartaa qaabab kala duwan oo ay ku gaadho.

Waa in aanu diirada saarnaa dadaalkeena dhismaha nidaam loogu talo geley isbadalada kor u qaadaya ikhtiyaarka amaanka ah oo meesha ka saaraya soo gaadhka waxyaabaha sunta ah ee dadka marka horeba.

Khidadaheenu, waxay diirada saarayaan sadex aag si ay u taageeraan isbadalka nidaamyada:



Isbadal Siyaasadda ah

Waxa uu u ololeeyaa isbadalada siyaasada ee kahortagaya inay waxyaabaha sunta leh dadka soo gaadhaan, u ololaynaya ikhtiyaarada amaanka ah, oo ku waajabinaya soo saarayaasha masuuliyada ah inay dhabarka u ritaan shaqada uruurinta waxyaabaha ay soo saareen ee sunta leh

Iskaashiyada

Bilaabidda iskaashiyo lala yeesho bulshooyinka, ganacsiyada, iyo hay'adaha si loo taageero dadka deegaanka iyo ganacsiyada yaryar oo loo ololeeyo hindisayaasha dhanka siyaasada.

Adeegyada iyo Taageerada

Inuu bixiyo adeegyo iyo taageero si loo caawiyo dadka deegaanka iyo ganacsiyada yaryar si ay u sameeyaan ikhtiyaaro iyo dhaqano amaan ah una dhisaan taageero ku aaddan isbadalada siyaasadeed

Khidadaha iyo Ficilada

Waxa aanu dooranaa khidadaheena iyo ficiladeena kuwaas oo ku salaysan natiijada daraasada bulsho iyo farsamo, jawaabcelinta aanu ku helno shirkada muhiimka ah, iyo ogolaanshaheena. Si loo gaadho isbadalada nidaamyada, yoolasheena, qaababka, khidadaha, iyo ficilada waa in ay ka wada shaqeeyaan si guud taageerada dadka, deegaanka, iyo isbadalada aanu doonayno in aanu aragno.

Aaga Yoolka 1: Ka ilaalinta dadka iyo deegaanka agabka waxyeelada leh.

- Khidada 1.1: Sare u qaadidda hindisayaasha masuuliyada soosaaraha ee la kordhiyay
- Khidada 1.2: Hormarinta siyaasadaha u ololeeya ikhtiyaarada amaanka ah
- Khidada 1.3: Kordhinta adeegyada iyo ikhtiyaarada uruurinta

Aaga Yoolka 2: Diirad saarida dadaalkeena bulshooyinka uu ugu saamayn badan yahay - ee guriga iyo shaqada.

- Khidada 2.1: Bixinta adeegyo ah luuqada iyo dhaqanka
- Khidada 2.2: Bilaabidda iyo ka war haynta xidhiidhka lala leeyahay bulshooyinka

Aaga Yoolka 3: Inaad noqoto u adeege wanaagsan khayraadka Barnaamijka.

- Khidada 3.1: Ku ladhidda iyo dhaqan gelinta mabaadiid' da sinaanta qoomiyadeed dhamaan shaqooyinka
- Khidada 3.2: Dhisidda awooda hay'adeed si looga jawaabo sinaan la'aanta qoomiyadeed
- Khidada 3.3: Aqoonsiga baahiyaha, arrimaha, iyo isbadalada soo muuqda
- Khidada 3.4: Waafajin shaqooyinkeena mudnaanaheena
- Khidada 3.5: Qiimaynta iyo maamulida waxqabadka
- Khidada 3.6: U maamulidda si la qabsi leh

Joogto Ugu Xidhnaw: www.HazPlanUpdate.com

Iimeyl Noogu soo Dir: info@hazplanupdate.com